



Somali Senate

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Golaha Aqalka Sare

Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya

UJEEDDO: BAAHIN SHAQO:

XOG-HAYAHA GUUD EE GOLAHA AQALKA SARE

TIXRAAC SHAQO LAMBAR: 001

CODSIGA SHAQADA WAXA UU FURAN YAHAY:

18 April – 24 April 2017

EMAIL: senatesom@gmail.com

Horudhac

Xog-hayaha guud ee Golaha Aqalka sare waa sarkaalka ugu sareeya dhanka maamulka marka laga soo tago guddoonka golaha iyo habdhowrayasha. Waxaana soo magacaabaya guddoonka golaha islamarkaana waxaa ansixinaya xubnaha golaha. Jagada Xog-hayaha guud waa mid Dastuuri ah. Shaqada ugu weyn ee Xog-haya waa inuu talo siiyo guddoonka golaha ee arimaha la xiriira nidaamka shaqo ee golaha. Wuxuu sidoo kale mas'uul ka yahay howlaha maamulka iyo xisaabaadka guud ee golaha. Xog-haya guud waxaa caawinanaya ku xigeenka Xog-hayaha guud si uu howlahiisa ugu guto si hufan.

Address

KM-0 Shibus Dist, Banaadir
Mogadishu-Somalia

Contacts

Email: info@senate.gov.so - senatesom@gmail.com
www.senate.gov.so





Waa jibaadka Shaqo ee Xog-hayaha guud ee Aqalka Sare

- Wuxuu u shaqeeyayaa sidii Xog-haynta guud ee Aqalka Sare
- Wuxuu keydiyaa ama diiwaan geliyaa waxyaabaha (qoraal, muuqaal, cod iyo sawir) ee ka soo baxa kulamada golaha iyo dhacdooyinka kale ee golaha saameynaya
- Wuxuu soo saaraa ama qoraa warbixinada howlaha golaha Aqalka Sare (minutes, reports, briefings, etc.)
- Wuxuu la socdaa dhamaan howlaha maamul iyo arimaha kale ee golaha
- Asagoo la kaashanaya Gudoonka Golaha, Wuxuu diyaariyaa agendayaasha fadhiyada golaha iyo kulamada kale ee guddiyada asagoo hubinaya in la gaarsiyo xubnaha golaha
- Xog-hayaha guud wuxuu xiriiriyya dhamaan howlaha golaha oo ay ku jiraan safarada xubnaha golaha
- Wuxuu hubiyaa in dhamaan howlaha golaha ay warbaahinta si fiican u tabiso isla markaana hubiyaa in la diyaariyo qoraalada loogu talo galey saxaafada
- Wuxuu dabagal ku sameeyaa isla markaana hubiyaa hirgalinta dhamaan go'aanada golaha
- Waa xiriiriyyaha golaha aqalka sare iyo dhamaan hay'adaha kale ee dawlada sida golaha shacabka
- Wuxuu si gaar ah ula socdaa isla markaana keydiyaa dhamaan qoraalada diiwaanada soo xaadirayaasha fadhiyada golaha
- Wuxuu ka caawiya xubnaha golaha inay sameeyaan qoraal qabyo ee su'aalaha iyo mooshinada
- Gaarsiyaa dhamaan go'aanada golaha hay'adaha dawliga ah ee ay quseyso
- Wuxuu daabacaa isla markaana keydiyaa biilasha, mooshinada iyo shuruucda kale ee golaha meel mariyo
- Wuxuu maamulaa lacagaha accountka golaha asagoo kaashanaya gudoonka golaha
- Wuxuu sidoo kale kormeeraa dhamaan shaqaalahaa golaha, wuuna shaqaaleysiya marka shaqaale loo baahan yahay
- Wuxuu Kor Ka eegaa hawl-maalmeedka waaxaha golaha ee uu masuulka ka yahay isaga oo la soconaya shaqaalahaa siday u fuliyaan hawlahooda.

Address

KM-0 Shibus Dist, Banaadir
Mogadishu-Somalia

Contacts

Email: info@senate.gov.so - senatesom@gmail.com
www.senate.gov.so





Shuruudaha looga baahan yahay

- Somali Senate**
- Inuu Soomaali yahay, dhimirkusu dhan yahay, aan danbe maxkamad xukuntey galin isla markaana da'diisa ka yareyn 30 sano
 - Ugu yeraan shahaada 2aad ee jaamacada (master degree) oo la xiriirta sharciga ama maamulka iyo maareynta ama wax u dhigma.
 - Inuu lee yahay ugu yeraan 7 sano oo khibrad shaqo ah oo la xiriirta howlaha maamulka.
 - Inuu ku hadli karo islamarkaana qori karo ugu yeraan luuqadaha Soomaaliga, Carabiga iyo Ingiiriska
 - Inuu lee yahay aqoon uu si fiican ugu adeegsan karo aaladda Komputerka.

Sida Loo soo codsanayo

Dadka daneynaya waxay ku soo codsan karaan qaab online ah oo keliya. Waxaa lala soo xiriiraya oo keliya dadka ku soo baxa liiska gaaban. Fadlan ku soo dir codsigaaga, Taariikh nololeedkaaga iyo nuqlu shahaadooyinkaaga ka mid ah emaillkan senatesom@gmail.com. Fadlan cinwaanka codsigaaga ka dhig jagada aad soo codsanayso iyo numberka tixraaceeda. Gabdhaha leh takhasuska iyo khibrada loo baahan yahay waxaa lagu boorinaya inay soo codsadaan ugu danbeyn codsigaaga soo dir 24 April 2017 4:00pm.

Address

KM-0 Shibus Dist, Banaadir
Mogadishu-Somalia

Contacts

Email: info@senate.gov.so - senatesom@gmail.com
www.senate.gov.so

